



War-Murtiyeed ku saabsan kala xadaynta Degmooyinka iyo Gobolada Puntland 04/01/2017

Waxay kooxa howleedyada PUNSAA u qaabilsan helitaanka Dawladnimo loo dhan yahay (Inclusive Governace Thematic Working Group) ay magaaloyinka ka mid ah Puntland ku qabteen kulamo looga hadlayey xuduud u kala samaynta Degmooyinka, Tuulooyinka, iyo Gobolada Puntland.

Markii la asaasay Puntland sanadkii 1998 dii, waxay ka koobnayd 5 gobol iyo 20 degmo haddana waxay maraysaa 9 gobol iyo 43 degmo. Dhammaan degmooyinkaas iyo gobolladaas la soo kordhiyey laguma dhisin shuruudaha looga baahan yahay degmo ama gobol ee waxa ay ku dhisan yihiin Qancin-Beeleed, loomana samayn wax xaduuda ah.

Degmooyinka cusub waxa ay tuulooyin markii hore u ahaayeen degmooyinkii hore, iyadoo sidaas oo kale gobolada cusubi ay degmooyin u ahaayeen goboladi hore. Waxa ka dhashay dhibaatooyin badan oo aan markii hore jirin oo ay ka mid yihiin:

- dadkii wada deganaa oo kala faquuqma oo qoloba degaan gaar ah loo asteeyey,
- khilaafaad xagga lahaanshaha dhulka ah,
- Muran xagga maamulka reer miyiga oo daaqa iyo ceelashaha biyaha kala sheegta.
- Waxa kale oo ay arintani lid ku tahay hawlihii demoqaraadiyeynta, isdhexgalka bulshada iyo wax wada lahaanshaha,
- Waxayna saamayn xun ku yeelan kartaa doorashooyinka Puntland ee 2019.

Dalladda Daneeyayaasha Aan Dawlga ahayn ee PUNSAA waxa ay u aragtay in ay lagama maarmaan tahay in arintan laga hadlo oo aan la dhayalsan. Kulankii ugu dameeyey oo heer degmo ah oo looga wada tashanayey xad u kala yeelidda degmooyinka iyo gobolada iyo waafajinta shuruudaha laga doonayo degmo iyo gobol waxa magaalada Garoowe lagu qabtay Bisha Disember 13 -14, 2016. Waxa ka soo qaybgalay aqoon yahano iyo masuuliyiin ka kala socotey degmooyinka oo ay ka mid ahaayeen guddoomiyayaasha degmooyinka Burtinle, Garowe, Dangorayo, Eyl, Qardho, Waaciye, Taleex, Laascaano iyo Wasaaradda Arimaha Gudaha ee Puntland.

Waxa sidaas oo kale ka qaybgalay ururada bulshada sida haweenka, dhalinyarada, saxaafadda iyo ganacsatada. Kulankaas oo si weyn loogu gorfeeyey xogta la xiriirta arimaha xuduud- u kala yeelidda degmooyinka iyo gobolada iyo saamaynta aan wanaagsanayn ee ay bulshada ku soo kordhiyeen, iyadoo

ay ka qayb galayaashu soo bandhigeen dhacdooyin la xariira dhibaatooyin ka jira dhanka xadduudaha degmooyinka iyo gobolada Puntland ee ka dhashay degmooyinka iyo gobolada cusub.

Talo soo jeedino

Si xal loogu helo dhamaan dhibatooyinka waxa shirka wada-tashigu isku raacay:

- In Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Puntland ay masuul ka noqoto dardar gelinta maareynta hawlaha xadaynta degmooyinka iyo gobolada ee Puntland iyadoo qaar badan ay qabaan in degmooyinki hore iyo goboladii hore dib loogu noqdo oo la tirtito magacaabidda degmooyinka iyo gobolada cusub ee ku salaysan qancin-beeleedka.
- Shirka wada tashigu wuxuu soo jeedinaynaa in dawladdu dejiso siyaasad iyo qorshe cad oo ku saabsan xaaladda xadaynta xadduudaha degmooyinka iyo gobollada Puntland.
- Inay dawladdu soo saarto xeerar kala xadaynaya degmooyinka iyo gobollada Puntland oo ku salaysan shuruudaha degmooyinka iyo gobolada buuxin kara.
- In madaxda dawladdu ay joojiso magacaabidda degmooyinka aan macquulka ahayn,
- Inay dawladdu si dhaqso ah u magacawdo guddi madax bannaan oo ka shaqeyya arimaha xadduudaha oo ka kooban dawladda iyo bulshada rayidka ah
- In la sameeyo wacyi gelin ballaaran oo ku saabsan arimaha a xadduudaha degmooyinka iyo gobollada Puntland.
- In la helo ciidan tababaran lehna awood fulineed lana shaqeyya gudiyada xaduudaha loo xilsaaray.
- Ka qayb galayaasha shirka wada tashigu waxay soo jeediyeen in bulshada hubka laga dhigo, dib u heshiisiinna loo sameeyo, dadkana lana diiwaan geliyo

Hay'adaha Caalimiga ah:

Shirku waxa uu ka codsaday Hay'addaha deeqda bixiya inay ku deeqaan farsamo iyo waxii tas-hiilaad ah ee looga baahdo hawlaha xuduudeynta gobolada iyo degmooyinka.

Dhinaca kale waxa shirka lagu bogaadiyay DALLADDA PUNSAA doorka ay mar walba ka qaadato fududeynta wada tashiga, maaraynta dhibaatooyinka iyo sii odorosidda dhacdooyinka khatarta ku ah ammaanka ummadda.

Guddoomiyaha PUNSAA:

Nuur Shire Cismaan

